



## **Xafiiska Qarammada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)**

### **WAR-SAXAAFADEED 15/2010**

#### **Ergeyga Gaarka ah ee Xogħaya Guud ee Qaramada Midoobay oo soo dhoweeyay taageerada ay dowladaha gobolku u fidiyeen geeddi socodka nabadda Soomaaliya**

Nayroobi, 09 July 2010 – Ergeyga Gaarka ah ee Qaramada Midoobay u qaabilسان Soomaaliya, Augustine P. Mahiga, ayaa maanta soo dhoweeyay go'aanka uu Urur Goboleedka IGAD ku qaatay shirmadaxeedkii lagu qabtay magaalada Addis Ababa 5tiibisha July ee 2010, go'aankaaso ah in si xoogan looga qaybqaato xal u raadinta colaadda Soomaaliya.

Ergeyga Gaarka ah Mahiga wuxuu hoosta ka xarriiqay taageerada uu Urur Goboleedka IGAD siiyay geeddi socodka Jabuuti oo ah saldhiga keliya ee nabadda iyo dibuheshiisiinta Soomaaliya. Taageeradan ayaa lagu qeexay warmurtiyeedkii laga soo saaray shirka.

“Qaramada Midoobay waxay sii wadi doontaa iskaashiga ay la leedahay IGAD iyo Midowga Afrika ee ku wajahan arrinta Soomaaliya iyadoo la raacayo Heshiiskii Isafgaradka ee Soomaaliya ee ay seddaxda Hay'adood kala saxiixdeen 28kii bishii Abril ee 2010”, ayuu yiri Ergeyga Gaarka ah.

---

Wixii war dheeraad ah fadlan kala xiriir: Susannah Price ama Donna Cusumano, saraakiisha qaabilسان isgaarsiintab guud, Xafiiska Qaramad Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya, Nairobi

Tel: +254 20 762 6805 / 6869 ama +254 733902020 ama 737400133

Fadlan eeg rugta Internet-ka (website):

**[www.unpos.unmission.org](http://www.unpos.unmission.org)**